

الآباء Väter  
Aabayaal  
Les pères  
باب Padres  
Babalar  
தந்தைகள்



## Termine

Freitags einmal im Monat  
um 18 Papaclub  
Nächste Termine: 17.04.,  
25.05., 26.06.

## Ferienprogramm Sommer

### Geplante Termine:

Samstag, 04.07., 11.07.  
und 18.07.2020

## Tipps für Eltern in Corona- Zeiten:

[www.fruehehilfen-bonn.de/](http://www.fruehehilfen-bonn.de/)  
[Tipps-fuer-Familien.htm](http://Tipps-fuer-Familien.htm)  
[www.diekurzgeschichte.de](http://www.diekurzgeschichte.de)

## Telefondienst während der Schließungszeit:

Montag-Freitag 9-15 Uhr

## Corona- Nachbarschaftshilfe

Du kannst nicht mehr raus  
und brauchst Hilfe? Du  
willst helfen? Sprich Marisa  
an 0151.28934343  
[ehrenamt@vielinbusch.de](mailto:ehrenamt@vielinbusch.de)

## Papas sind wichtig! Aabayaashu waa muhiim!

Die Bedeutung der Mutter für ein Kind ist gründlich erforscht. Aber welchen Einfluss hat ein Vater auf die Entwicklung? Forscher sagen, dass die Liebe des Vaters genauso wichtig für die Entwicklung des Kindes ist wie die Mutterliebe.

Die Mutter kümmert sich um Haushalt und Kinder, der Vater geht arbeiten und verdient das Geld. So war das bei den „Simpsons“ in der amerikanischen Comicserie oder in der bekannten deutschen Serie „Lindenstrasse“. Jahrzehntlang bestimmte auch in Deutschland diese Rollenverteilung das klassische Familienbild, in dem allein die Frau für die Kindeserziehung verantwortlich war. Doch die Zeiten haben sich schon etwas verändert.

### Unterschiedliche Vaterrollen

Väter gehen oft anders mit ihrem Nachwuchs um als Mütter, die ihre Kinder behüten und beschützen. Väter sind eher fordernd und mutiger im Umgang mit dem Kind.

Psychologen sagen: Dieser fordernde, väterliche Einfluss ist wichtig für die Entwicklung des Kindes. Es hilft ihm stärker zu werden.

## Väter können die Tür zur Welt öffnen

Als „werdende“ Väter bereiten sich Männer mit ihrer schwangeren Partnerin auf die Geburt ihres Kindes vor. Eine Familie wird gegründet und alles verändert sich im Leben der Eltern. Der Mann muss erst lernen, mit der neuen Rolle umzugehen. Mit der Entwicklung der Kinder verändern sich auch die Aufgaben der Eltern.

### Geburt und erste Jahre

Heute durchtrennen junge Väter die Nabelschnur und beenden so die naturgegebene Verbindung von Mutter und Kind. Ein Symbol für die Rolle des „neuen“ Vaters:

Er ist derjenige, der die enge Mutter–Kind–Zweisamkeit auflösen kann und auch soll.

Ein Säugling bzw. Kleinkind wird meist durch die Mutter, eher selten nur durch den Vater betreut. Es ist in dieser Phase auch mehr auf die Mutter angewiesen, wenn diese zum Beispiel stillt. Schon in dieser Phase können Väter aber durch liebevolle Beschäftigung eine gute Bindung zum Kind herstellen.

### Kitazeit

Mit der weiteren Ablösung von der Mutter kann sich die Rolle des Vaters dann immer mehr vertiefen. Das Kind kommt in den Kindergarten und die Bedürfnisse der Kinder verändern sich. Gerade in dieser Phase brauchen Kinder beide Eltern um sich zu einem eigenständigen Menschen zu entwickeln. Väter verbringen dabei oft mehr Spielzeit mit dem Sohn als mit der Tochter, heißt es in der aktuellen Familienforschung. Aber auch Mädchen brauchen Väter, die sie dabei unterstützen „groß und stark“ zu werden.

**Schulzeit**  
Mit der Einschulung verändert sich die Rolle der Väter noch einmal sehr. Ein Kind in einer weiterführenden Schule ist dann schon viel selbstständiger als ein Kind in der Grundschule. Dabei hat gerade das Verhältnis von Vätern und Töchtern eine besondere Bedeutung in der Entwicklung der Mädchen. Für Mädchen wird der Vater zum Spiegel, lange bevor es „Germany’s Next Topmodel“ entdeckt.

### Pubertät

In der Pubertät verändert sich das Verhältnis Vater–Kind noch einmal.

Hier gilt: Starke Väter loben! Sie weichen Kämpfen mit ihren Kindern nicht aus, sondern tragen diese auf Augenhöhe aus. Und entdecken z.B. auch Stärken in der Tochter.

### Erwachsene Kinder

Sind die Kinder dann schließlich erwachsen und in der Ausbildung/Studium, ziehen aus und gründen ihre eigene Familie, ist die Rolle eines Vaters wieder anders. Väter helfen und unterstützen mit Rat und Tat bei der Berufswahl oder bei der ersten Wohnung.

### Enkelkinder

Sobald Enkelkinder auf der Welt sind, ist die nächste Rolle die des Großvaters.

Leider können manche Väter erst in dieser Phase die Zeit mit Kindern und Enkelkindern genießen und die Rolle ausfüllen und auch genießen.

## Die Vaterrolle annehmen

Die Arbeitszeit beeinflusst die Zeit für die Familie. Machen Väter direkt nach der Geburt viele Überstunden und „flüchten“ sich in ihre Arbeit? Müssen sie häufig abends oder am Wochenende „in Bereitschaft“ sein oder arbeiten? Oder halten sie sich gerade diese Zeiten für ihre Familie frei? Nehmen sie Elternzeit, zumindest die Vätermomente? Reduzieren sie ihre Arbeitszeit, damit ihre Partnerin nach der Elternzeit wieder voll in ihren Beruf einsteigen kann? Unterstützen sie die Entwicklung ihrer Kinder mit Erziehungs- und Betreuungsarbeit? Das sind Fragen, die sich jeder Vater stellen sollte.

Im Haus Vielinbusch gibt es Gelegenheit dazu, im "Papaclub" gemeinsam darüber zu diskutieren. Bei den ersten beiden Treffen im Januar und Februar ging es darum, sich kennen zu lernen und eigene Wünsche und Vorstellungen zu nennen. Wir haben danach über Medienerziehung und über unseren Umgang mit Smartphone, Tablet und Notebook gesprochen. Im Januar gab es einen ersten Ausflug nur für Papas mit ihren Kindern. Vier Väter (einer davon Großvater) engagieren sich im Papaclub. Alle zusammen möchten die Anliegen der Väter stärken und in den Mittelpunkt rücken wo sie hingehören – zum Wohl unserer Kinder!

## Aabayaashu waa muhiim! Papas sind wichtig!

Micnaha ay hooyadoodu samayso caruurteeda ama saamaynta ay ku leedahay aad baa cilmi-baadhis loogu sameeyay. Hadaba Aabuhu saamayn intee le'eg buu ku leeyahay horumarka caruurta? Dadka cilmi-baadhista sameeya waxay soo ogaadeen in jacaylka aabuhu muhiim u yahay caruurtiisa si lamid ah jacaylka hooyadu ilmaheeda u hayso.

Hooyadu guriga iyo caruurta bay haysaa daryeeshaana, Aabuhuna wuu shaqo tagaa oo lacag soo shaqeeyaa. Sidaasay ku jili jireen filimkii maadayska ama kaftanka maraykanka ahaa ee la odhan jiray „Simpson“ ama filimkii caanka ahaa ee Jarmalka ahaa ee la odhan jiray „Lindenstasse“. Tobanyaalo sano kahor hawlaha qoyska sidaas buu u kala qaybsanaan jiray xitaa qoysaskii hore ee Jarmalku, oo laysku raacsanaa in hooyadu korinta iyo barbaarinta caruurta u xilsaaran tahay. Hadda dabcan wakhtigii sidii hore ma aha oo wuu isbadalay.

## Doorarka kaladuwan ee Aabaha

Aabayaashu si kaduwan midkan hooyada ee ah ilaalinta, daryeelka iyo difaaca ayuu waxtar ugu leeyahay caruurtooda. Aabuhu wuu kaga geesigan iyo ad-adayg badan yahay caruurta marka la barbar-dhigo hooyada. Culumada Cilmi-Nafsiyad waxay sheegeen: in adadayga iyo saamaynta Aabuhu ay muhiim u tahay horumarka caruurta oo waxay ka caawisaa in caruurta adadayg yeeshaan.

## Aabayaashu waxay furi karaan abaabka aduunka

Qofka Aabo cusub noqonayaa wuxuu isaga iyo lamaanihiisu isu diyaariyaan dhalashada ilmahooda. Qoys baa la yagleeli doonaa ama la samayn doonaa kadibna wax kasta wuu isbadali doonaa. Ninku waa inuu markiiba bartaa siduu doorkiisa cusub uga soo bixi lahaa. Hawlaha waalidku way isasii badalaan inta lagu jiro koritaanka caruurteena.

### Marka ilmuhu dhasho iyo inta lagu jiro sanadka koobaad.

Marka ilmuhu dhasho Aabaha–Maanta wuxuu ka jaraa mandheerta ama xudunta dabiiciga ah isku xidha hooyada iyo ilmaha dhalanaya. Waana calaamadaha doorka Aabaha–cusub ee maanta: Aabuhu waa midka sida dhow ama kooban ee hooyada iyo ilmuhu mandheerta isug xidhan yihiin soo gababeeya ama ay tahay inuu kala jaro. Ilmuhu intuu aadka u yar yahay hooyada baa haysa, Aabuhu inta badan ma xanaaneeyo ilmaha intuu aadka u yar yahay. Inta lagu jiro xiligan hore ee ilmuhu yar yahay hooyada ayaa ilmaha ka ag–dhow oo waxaa kamid ah mararka ay nuujinayso. Markan iyada ah Aabuhu waxyaabo badan oo ilmahiisu ku jeclaan karo buu samayn karaa si isaga iyo ilmaha xidhiidh fiican u dhexmaro.

### Xiliga ilmuhu Goobaha–xanaanada bilaabo

Xididaysiga iskuxidhnaanta Aabaha iyo ilmaha wuxuu sii xoogaysan karaa markuu cunugu goobta xanaanada bilaabo ee hooyada iyo ilmuhu kala fogaadaan. Haddana waxaa xigi doona xiligii Kindergartenska oo baahida ilmaha isasii badasho. Markan iyada ah caruurta way u baahan yihiin labada waalidba si ay ilmaha shakhsiyadiisa bilow–aadnimo ama dadnimo u korto. Aabayaashu inta badan wakhtigooda ugu badan waxay galiyaan ama la ciyaaraan wiilasha marka loo barbardhigo hablaha/gabdhaha ay dhaleen, sidaasay yidhaahdaan kuwa cilmibaadhista ku sameeya qoysaska. Habluhu/Gabdhuhu way hees jecel yihiin, dhinaca hadalkana ka badiyaan wiilasha. Lakinse ogsoonow in xitaa habluhu/gabdhuhu Aabayaashood ubaahan yihiin si ay “adkaysi badan” u yeeshaan.

### Xiliga ilmuhu iskuulka bilaabo

Kolka iskuulka caruurta bilaabaan doorka Aabahu si xoogan buu isbadalaa. Ilmaha dhigta iskuulka dhexe ama sare wuu iskaga filaanshiinyo badan yahay marka labarbardhigo midka dugsi hoose dhigta. Sidaas awgeed xidhiidhka u dhexeeya Aabaha iyo Inantiisa ama Gabadhiisa micno khaas ah buu u sameeyaa koritaanka Gabadha. Aabahu Inantiisa ama Gabadhiisa wuxuu u yahay sida muraayada ay isku daawato oo kale, waxaana la ogaaday arintan mudo fog kahor intayna kuwa soo caanbixiya dadka caanka–noqda ee Jarmalku ogaanin ama daahfurin.

### Xiliga Qaangaadhka

Xiliga Qaangaadhka hadana markale buu isbadalaa xidhiidhka ama siday u wadadhaqmayaan Aabaha iyo ilmahiisu ama cunugiisu. Markan iyada ahi waa xiliga awooda iyo adadayga Aabanimo la amaano! Aabahu wakhtigan ilmihisa qaangaadhaya ama xiniinyo–guduudiska ah hardanka ka dhexeeya adadayga buu lasoo baxaa oo isumadhiibo ilmihisa, lakiinse meel sare ama fog buu Aabuhu waxkafiiriyaa. Sidoo kale Aabahu wuxuu ogaadaa meelaha inantiisu ama gabadhiisu ku fiican tahay ama ku roontahay.

### **Marka caruurtu waynaadaan**

Markan caruurtaadii way waynaadeen ama kaa koreen oo Waxbarasho Jaamacadeed ama Tababar–Xirfadeed bilaabeen, amaba reero yeesheen ama guursadeen. Hadana markale baa doorka Aabuhu isasii badalayaa. Aabuhu markan ilmihisa wuxuu ku caawiyaa waano, wax–usheeg iyo wax–qabad jooqta ah oo khuseeya waxbarashada uu ilmihisu doortay ama guriga uu dagayo ee koobaad.

### **Awoownimada**

Marka ilmaha awoowga aad u tahay dhasho waxaa bilaabmaya doorka awoownimo, nasiibdaro xiligan Aabayaasha iyo Awoowyada qaarkood wakhti ay la qaataan caruurtooda ma helaan ama doorkooda kaga soo baxaan.

### **Qaadashada doorka Aabanimo**

Wakhtiyada shaqadu saamayn badan bay ku leeyihiin arimaha qoyska. Aabayaasha qaarkood marka ilamahoodu dhashaba saacadaha shaqadooda baa sii bata ama shaqada bay ku cararaan. Ma inaad habeenkii ama todobaaka dhamaadkiisa shaqada diyaar ama heegan u ahaataa? Mise waa inaad wakhtigan isaga ah fasax u ahaato reerkaaga ama qoyskaaga? Ma qaadataa fasaxa waalidiinta ee loogu talagalay qoysaska ama ugu yaraan bisha–qoyska ee Aabayaasha la siiyo? Saacadaha aad shaqayso ma yaraysaa si aad qofka aad wadanooshihiin markuu kadhamaado fasaxa–waalidiintu si firfircooni leh shaqadiisa ugu noqdo? Ma caawisaa hormurka iyo koritaanka ilmahaaga ama cunugaaga? Waa su'aalaha Aabo kastaa ay haboon tahay inuu iswaydiiyo.

“**Ururka Aabayaasha**” ee guriga layidhaahdo Vielinbusch ka jira baa arintan aad loogaga wadhadlaa. Kulamadii ugu horeeyay ee qabsoomay bilihii January iyo February waxay ku saabsanaayeen isbarasho Aabayaasha u dhaxeeya. Waxaa xigtay oon kawada hadalnay sida caruurta loogu tilmaamo isticmaalka Taleefoonada, Kombuyuutarada, Shaashadaha iyo waxkastoo kusaabsan qalabka war–isgaadhsiinta. Bishii January dalxiis bay u baxeen Aabayaasha iyo caruurtooda oo kaliya. Afar Aabo oo hal Awoowe ku jiro baa ka qaybqaata ururka Aabayaasha. Waxay dhamaantood doonayaan in arimaha Aabayaasha khuseeya xoojiyaan ooy waliba tiirdhaxaad u noqdaan doorka Aabayaashu ama Awooweyaashu ku leeyihiin qoysaskooda si caruurteenu farxad iyo raynrayn ugu noolaadaan!

## **So erreichst du uns**

Email [verwaltung@vieleinbusch.de](mailto:verwaltung@vieleinbusch.de), Telefon 0228/76363873, WhatsApp Message 0160 93034184 oder persönlich: Opper Str. 130, 53119 Bonn, Eingang Erdgeschoss gegenüber Kaufland

Es grüßen Mona, Brihan, Gabi, Jürgen, Katja, Lena, Manar, Marisa, Mauricio, Samir und Yamina